

Bilaabidda Ilaalada Xaafadda



seattle.gov/crime-prevention

Getting Started

Sideebay u Shaqeeyaan Ilaalada Xaafadda?

Ilaalada Xaafadda waxa looga baahan yahay labo go'aan asaasi ah:

1. Go'aan ku saabsan inaad u tureyso hantida dariskaaga iyo wanaagooda iyo sidoo kale tan naftaada.
2. Go'aanka inaad soo sheegeyso dhaqdhaqaaqyada shakiga leh iyo inaad tallaabo ka qaaddo adigoo u digaya dariskaaga isla markaana wacaya 9-1-1.

Sidee baan Ku Bilaabi Karaa?

- Ka fakar goobta marka ugu horreysa aad la kulantay. Waxey ahaan kartaa gurigaaga, ama guriga dariskaaga, laybareeriga ama xarunta bulshada iwm
- La Xiriir Xiriiriyaha Ka Hortagga Dambiyada ee agagaarkaaga taariikhda iyo waqtiga si xiriiriyuhu kuula kulmo adiga iyo dariskaaga. seattle.gov/police/crime-prevention/crime-prevention-coordinators
- Ku martiqaad dariskaaga iney yimaadaan – way wanaagsan tahay inaad si qof ahaan aad u casunto.
- Kulanka ugu horreeya waxa looga hadli doonaa noocyada dambiyada xaafadda, qiyaasaha ka hortagga iyo sida xaafadda sida wadajir ah u wada shaqeyn karaan.
- Horjoogaha u xilsaaran Ilaalada Xaafadda wuxuu u shaqeyn doonaa sida qofka Booliska Seattle la soo xiriirayaan oo la hadlaya xaafadda.

Maxaa Loogu Baahan Yahay Ilaalada Xaafadda?

Daris wada shaqeeya waa shaqeeya waa khadka ama leenka ugu horreeya ee iska difaacidda dambiyada.



SPD Crime Prevention

9/2021 V.1

Printing made possible through the
Seattle Police Foundation

